
# Kiisaska musuqmaasuqida Cayrta iyo Qaadida Dacwadooda

Welfare Fraud Cases and Hearings

## Waa maxay musuqmaasuqida cayrtu?

Haddii hay'ad dowli ahi ay u malayso inaad been u sheegtay ama aadan siin akhbaarta ay u baahaayeen si ay kuu siiyaan manfacyada dowladda, waxaa dhici karta inay kugu eedeeyaan musuqmaasuqid cayreed. Manfacyada dowladda waxaa ku jira:

- MFIP (Barnaamijka Maalgelinta Qoyska ee Minnesota)
- DWP (Barnaamijka u Weecinta Shaqada)
- SNAP (Barnaamijka Gargaarka Kabida Nafaqada ah) (cuntada cayrta)
- Gargaarka Haynta Ilmaha
- GA (Gargaarka Guud)
- Gargaarka Guryaha (oo horey loogu yaqaanay Guryaha Degaanka ah ee Kooxaha)
- MSA (Minnesota Supplemental Aid)
- Gargaarka Degdeg ah (EA)
- Gargaarka Degdeg ah ee Guud (EGA)
- Iyo kuwa kale



Musuqmaasuqyada sidoo kale waxaa ku jira gadida ama isku dayga gadida manfacyada SNAP ama kaararka EBT (Ku Dirida Manfacyada Kumbuyuutarka). Ama isku dayida ku gadashada tubaako ama khamri kaarka EBT ga.

## Ka waran haddii baare dambiyada musuqmaasuqida cayrta uu ila soo xiriiro?

**Inta badan waxaa roon inaadan waxba oran.** Wax walba oo aad ku tiraahdo baaraha musuqmaasuqa ama aad tiraa xilliga dhagaysiga dacwooyinka madaniga ah ee (ADH) (hoos ka eeg) adiga ayaa laguu adeegsan karaa ha dhow. Haddii aad tiraahdo ama aad saxiixdo wax, adiga ayaa baxar lagugu gelin karaa waxaas. Haddii aad ka jawaabto su'aalo, wax kasta oo aad tiraahdo adiga ayaa laguu adeegsan karaa.

Hase yeeshee, sida uu dhigayo Qodobka 5aad ee Dastuurka Mareykanku (U.S.), waxa aad xaq u leedahay inaadan ka jawaabin wax su'aalo ah! Qodobka 5aad ee Dastuurka macnahiisu waa inaysan khasab kugu ahayn inaad la hadasho baaraha musuqmaasuqa ee dowladda. Ma aha inaad afkaaga baxar isku geliso kolka uu socdo kiis dambi ahi ama xilliga dhagaysiga dacwooyinka (ADH) ka ah. Waxaa dhici karta inay ku caawiso inaad kala hadasho qareen arrimahan oo kale.

## Waa maxay Qaadida Dacwada Mamnuuca Maamulku (ADH)?

Haddii dowladdu ay kugu eedayso musuqmaasuqid cayrta ah, waxa ay kugu maxkamadeyn kartaa dambi ama waxa ay qaban kartaa waxa la yiraa qaadida dacwada mamnuuca maamulka (ADH) ama labadaba. Qaadida dacwada (ADH) ahi waa qaadid dacwo si loo go'aansado inaad musuqmaasuq geysatay si aad u hesho manfacyada dowladda ama aad isku dayday inaad gado manfacyada, ama aad u isticmaashay manfacyada inaad ku gadato khamri ama tubaako. Haddii aad xaq u leeyahay manfacyadda, waxa aad xaq u leedahay iyana inay kuu socdaan ugu yaraan ilaa iyo inta xaakim uu go'aan ka gaarayo ka dib dacwo qaadida.

## Maxay u baahan tahay dowladdu inay cadeyso?

Qaadida dacwada (ADH) ah, dowladdu waa khasab inay keento cadeymo iyo daliilo macquul ah oo musuqmaasuq. Taa macnaheedu waa inay soo bandhigaan daliilo ah inaad u sameysay ama aad u tiri wax si **kas ah** si aad uga hesho dowladda wax aysan ahayn inaad hesho. Ma aha musuqmaasuq samyn haddii aadan fahman nidaamyadda ama haddii aad khalad sameyso.

## Maxaa dhici haddii xaakimka qaadaya dacwada (ADH) ah uu igu helo inaan musuqmaasuq geystay?



Kiisaska intooda badan, waxaa laguu diidi manfacyada muddo 1-sanno ah marka ugu horeeysa ee aad xadgudub sameyso, 2-sanno marka labaad ee aad xadgudub sameyso, si ramsi ah ayaa laguugu diidi manfacyada kolka sedexaad ee aad xadgudub sameyso. Hadii laguu diido manfaca la yiraa MFIP ka, waxaa sidoo kale isna laguu diidi karaa manfaca SNAP. Haddii uu xaakim kugu helo inaad iska hal mar ka wada qaadatay manfacyada SNAP ka in ka badan hal gobol, waxaa laguugu diidi karaa manfacyada SNAP ka muddo 10 sanno ah. Qaadida dacwada (ADH) ah awgeed xabsi laguuguma diri karo, laakiin wax walba oo aad tiraahdo ama wax walba oo ay dowladdu ogaato xilliga qaadida dacwada (ADH) ah adiga ayaa laguu adeegsan **karaa** haddii dacwo maxkamadeyn ah ay furaan. Siddoo kale waxa aad ka xareysan kartaa racfaan Maxkamad Degmo. Si gaar ugu fiirso mudadda kama dambaynta ah ee racfaanka ay tahay in la soo xareeyo. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Racfaan Uga Qaadashada Macaashka Dadaweynaha Maxkamadda Degmada*.

## Ma inaan faraha ka qaadaa qaadida dacwada?

**Maya! Haddii aadan ogolaanayn inaad geysatay waxa lagugu soo eedeeyey aadna diyaar u tahay inaad qaabisho ciqaabidyo.** Dowladdu waxa ay u badan tahay inay ku waydiisato inaad u saxiixdo foom aad uga tanaasulayso qaadida dacwada. ***La xiriir xafiiska dhanka sharciyada (legal aid) si aad talo uga hesho ka hor inta aadan wax saxiixin!*** Foomkan badanaa waxa uu leeyahay dhowr waxyaabood oo la kala dooranayo, kolkaa waxaa fiican inaad la hadasho qareen inta aadan waxba sameyn. Haddii aad wax saxiixdo waxa aad faraha ka qaadaysaa xaquuqdaada aad u leedahay qaadida dacwadaada. Waxaad kaloo waayeysaa manfacyadaada xataa hadii aadan ogolaan sameynta waxa ay dowladdu tiri waa aad sameysay. Haddii aad saxiixdo foomka, waxaa aad ka noqo kartaa ka hor inta u diididu aysan dhaqan gelin ama 30 cisho gudahood hadba kii soo hormara. Kala xiriir xafiiskaaga dhanka sharciyadda (legal aid) hadii aad su'aalo qabto khadka ah 1–(877) 696-6529.

## Wali ma la igu soo oogi karaan dacwo dambi ah?

Haa. Dowladdu waxa ay kugu qaadi kartaa labadaba dhagaysi dacwo (ADH) ah iyo maxkamadeyn dacwo dambi adiga.

## Ka waran hadii ay dacwo dambi oo maxkamadeyn ah ay furaan?

Kolkaa waxa inaad waydiisato iyaga inay joojiyaan ama ay dib u dhigaan qaadida dacwada (ADH) ah. Sidoo kale waa inaad la hadasho qareen dacwooyinka dambiyada ah qaabilsan markiiba! Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato qareen lacag la'aan ah. La xiriir xafiiska Maamulka Maxkamada Degmadaada si aad u waydiiso sida loo codsado qareen lacag la'aana.


## Ka waran haddii aan racfaan ka qaato ogaysiis ku saabsan joojin ama dhimid manfacyadayda?

Racfaankaa waxaa lagu dari karaa qaadida dacwada (ADH) ee musuqmaasuqa ah. **Hel caawimaad dhanka sharciga ah markiiba.** Qaadidda dhageysiga dacwaddu waa mid dhib leh, waayo waxa ay tahay dowladdu inay u cadeyso jarida manfacyadaadda waa ay ka duwan yihiin waxa ay tahay cadeeynta musuqmaasuqu. Dowladdu kaliya waxa ay u baahan tahay inay cadeyso in cadeymaha intooda badani inay dhinacooda yihiin si loo jaro ama loo dhimo manfacyadaadda. Laakiin waxa ay u baahan yihiin cadeyn cad iyo daliilo macquul ah si ay u cadeeyaan inaad geystay musuqmaasuq.

## Ka waran haddii la igu helo dambi musuqmaasuq ah ama haddii aan ku jiro barnaamij weecin ah?

Haddii lagugu helo inaad geysatay dambi khaa'inimo ah si aad u hesho cayr, waxa aad waayi kartaa manfacyada, hadii lagugu helo dambi, xabsi ama ganaax labadaba waa aad qaabilaysaa.

Haddii dacwada (ADH) ku ay go'aamiso inaad geysatay musuqmaasuq, waa inaad dib u bixisaa manfacyaddii aad heshay. Waxaa kale oo aad waayi kartaa manfacyada muddo 1-sanno ah marka ugu horeeysa ee aad xadgudub sameyso, 2-sanno marka labaad ee aad xadgudub sameyso, si ramsi ah ayaa laguugu diid manfacyada kolka sedexaad ee aad xadgudub sameyso. Arrintani waa mid dhab ah xataa haddii aad ku jirto barnaamij weecinta ah ama xukun ku qaadid la'aan ay maxkamadi amartay ama xabsi dowlo.



## Ka waran haddii aanan ahayn muwaadin (U.S.)?

Hadii aadan ahayn muwaadin Mareykan (U.S.) ah, ula tasho qareen si degdeg ah. Ku helid dambi musuqmaasuqid cayreed ahi waxa uu saameyn karaa sharcigaaga (immigration) wadanka.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**